

26 sano jir China ah oo noqotay qofka ugu Hantida badan wadanka China.

Gabr 26-sano jir ah oo u dhalatay Wadanka China ha ayaa noqotay Qofka ugu hantida badan ee dalkaas iyada oo lagu qoray halka ugu sareysa liiska lagu soo bandhigo Dadka ugu taajirsan Wadankaas ,waxa ayna Majalada la yiraahdo Forbes Daabacday in gabadhan ay haysato Aduun lacageed oo gaaraya £8.8bn una dhiganta \$16 billion oo Dollar.



Yang Huiyan (Midig)Qofka ugu taajirsan Chinaha.

Gabadhaan oo la yiraahdo Yang Huiyan ahna 26-sano jir ayaa ugu kormartay Liiska Maalqabeenada lagu qoro Ee wadanka Chinaha Bishii April markii ay beerta Aabaheyd ay aad ugu sare kacday Suuqyada wadanka China ha ilamarkaasna ay gaartay halka ugu sareysa,iyadoo halmar ay ka soo xarootay Aduun Gaaraya shan billonaires.

Gabadhan Aabaheyd oo la yiraahdo Mr Yeung Kwok Keung Ayaa horay ugu shaqeynjiray Shirkad Qaabilsan Dhismaha ka hor inta uusan helin Lacagtaan ,marka loo ego wararka ay daabaceen Wargeysyada Chinaha ninkan ayaa gabadhiisa u xawilay Hantidee uu ku lahaa Shirkada la yiraahdo Country Garden Holdings co. sanadku markii uu ahaa 2005tii ,waxa uuna xawilay 60% hantidee uu ku lahaa shirkada ,Walina waxa uu yahay mid ka mid ah madaxda sare ee shirkataas,isagoo hayo xilka Gudoomiyanimada.



Yeung Kwok-keung oo faraxsan, 20 April, 2007

Yang Huiyan ayaa Bishii April waxaa usoo xarootay Aduun Lacageed oo Gaaraya £4.4bn oo ah lagacta Wadanka Britain, laakiin hantideeda ayaa sii kordheysay wixii xiligaa kadambaysay.

Sida ku cad Qoraalka lagu soo daacabay Forbes waxa ay gabadhaan sidoo kale Noqoneysaa qofka ugu hantida badan Qaarada Asia oo dhan, waxa ayna sidoo kale ku dhowdahay inay Noqoto Qofka Aduunka ugu hantida badan maadaada ay qarka usaarantahay hanti ku dhow tan ay heystaan Dadka ugu hantida badan Maricanka sida: Bill Gates oo heysta hanti gaareysa £29bn iyo Warren Buffet too isna heysta lacag dhan £25bn.

Ms Huiyan, oo ah gabar ka qalinjabisay Jaamacada Ohio State University ee ku taal Cariga wadanka Maricanka ayaa lagu soo waramayaa inay guursatay Wiil uu dhalay Sarkaal sare oo ka tirsan Dowlada chinaha Sanadkan.



Yeung iyo Saygeeda oo wada taagan intee lagu jiray Xafladii Arooskooda

Waa mid ka mid ah tiro yar oo dad ah oo ku guuleystay Qaninimo ceenkaan ah, sidoo kale waxa ay xubin ka tahay dadka gaaraya Toboneeyo kuwaas oo sanadkan uu sameeyay Hormar Dhaqaalahooda kana kala socday 40 -tan wadan oo waduunka ah.



Qoyska Yang Huiyan.

Booska labaad waxaa galayay Hui Wing Mau oo ah mid kamid ah dadka uu kubaca dhaqaaalhooda sareeyo waxa uuna heystaa Aduun gaaraya £3.6bn halka saddexaadna uu yahay in Gudoomiye ka ah Shirkada la yiraahdo manufacturing oo helay £2.4bn oo lacagta Britain.

Russell Flannery, oo ah tifaftire sare oo ka tirsan Majalada la yiraahdo Forbes ayaa yire: "Qarashaadka soo galaya qoysaska ayaa si dag-dag ah sara uku kacaya ,waxaana jira tiro dadyow ah oo uu soo dhaqaaqaya Magaalooyinka ,iyaga oo ka yimid dhanka miyiga ,waxa ayna isku dayayaan inay abuuraan Ganacsi weyn si ay fursad ugu helaan inay hormariyaan Dhaqaalahooda."

Sanadkii Lasoo dhaafay ayaa waxa ay noqotay Haweeneyda la yiraahdo Ms. Zhang Yin oo ka tirsan Shirkada la yiraahdo founder of Nine Dragons Paper Co nambarka 5-aad Halka ay sanadka ka tagtay Booska 11-aad oo ay uga qorneyda Warbixinta Forbes.

W/D: Muxyadiin Axmed Rooble
Nairobi, Kenya
Email: saadaam_7@hotmail.com
Yahooemail: muhudin01@yahoo.com

Faafin:: SomaliTalk.com | Oct 24, 2007